



Waa maxay farqiga u dhexeeya isbitaal jiifin iyo Waaxda Daryeelka Gaarka ah (ICU) jiifin?

May 2022

Isbitaal jiifin waa ogolaansho qof isbitaal loo jiifiyo si loo daryeelo. Taas oo ay ka mid yihiin xaalado caafimaad oo kala duwan sida lug jabtay, ama xanuun kale oo halis ah.

ICU waa Waaxda Daryeelka Gaarka ah. Waxaa lagu daryeela xanuunada ugu ba'an oo ugu halista badan, halkaas oo bukaanadu u baahan yihiin daryeel iyo la socod joogto ah. Waxay badanaaba qaadataa asbuucyo ilaa bilo in qofku si buuxda uga soo bogsoodo xanuunkii loo jiifiyey Waaxda Daryeelka Gaarka ah (ICU).

Tallaalku wuxuu aad u yareeyaa fursadaha aad isbitaal ku galeysid, waxaa taa ka sii muhiimsan, aad ku galeysid waaxda daryeelka gaarka ah. Taasuna waa sababta ay muhiim u tahay in aad si buuxda u tallaalan tahay.

Ma su'aalo ayaad wali qabtaa? Taasu waa caadi. Wixii xogo dheeraad ah ka doono rugta caafimaadka degaankaaga, isbitaalka kuugu dhow, ama booqo bogga Su'aalaha iyo Jawaabaha ee Hay'adda Caafimaadka Adduunka (WHO) ee halkaan: <https://bit.ly/3KXDyDz>

Financial contribution from
Avec le financement de

Public Health Agency of Canada Agence de la santé publique du Canada


Social Determinants of Health

Waxaa xaqiijiyey MedComm - oo ah Naadiga Gaarista ee Ururka Ardeyda Caafimaadka ee McGill.

Haddii aad dooneysid xogo dheeraad ah?

Waxaad xogo dheeraad ah ee caabuqa Koofid-19 (COVID-19) ka heli kartaa halkaan: <https://bit.ly/3qQHmOx>

Qoraalkan looguma talogalin in uu beddel u noqdo daryeelka iyo talada xirfadeed. Had iyo jeer raadso adeegyada xirfadle caafimaad ama adeeg bixiye caafimaad kale oo la aqoonsan yahay si aad u weyddiiso su'aalaha laga yaabo in aad qabto.